



Xaqiiqooyinka Talaalka ee loogu talagalay Bulshooyinka Muslimka ah

Talaalka COVID-19 ma waxa ku jiraa nud uur-jiif? Labada talaal ee markii ugu horreysay laga helay Maraykanka — **Pfizer Comirnaty iyo Moderna** — laguma soo saarin iyadoo la isticmaalayo unugyo uur-jiif, taas oo micnaheedu yahay in cribada aad qaadaneysid eysan ku jirin unugyo uur-jiif ah.

Fayrasyadu waxay u baahan yihiin unugyo nool si ay u koraan. Cilmi-baarayaashu waxay soo saareen “cell lines” oo ah unugyo nool oo loogu tarmiyo qaab aan qeexnayn shaybaadhka, waxaana loo isticmaala in lagu koriyo fayrasyada. Horaantii soo saarista talaalkan COVID-19, **khadka unuga uur-jiifka** ayaa loo isticmaaley in lagu tijaabiyo in waxyaabaha uu ka kooban yahay, messenger RNA (mRNA), ay u shaqaynayaan sidii loogu talagalay. Tijaabooyinku waxay muujiyeen in mRNA, marka loo soo bandhigo unugyada aadanaha, waxay soo saartaa borotiin fayras ah oo inoo suurtagaliya inaan ka samaysano difaac fayraska keenaya COVID-19.

Talaalka **Johnson & Johnson** waxay isticmaalan fayraska (“Adenovirus 26”) kaas oo aan istarmin karin. Marka fayraskan loo soo bandhigo unugyada aadanaha, waxay soo saaraan isla borotiinkii fayraska sida talaalada kale, taas oo inoo suurtagalinaysa inaan ka samaysano difaac COVID-19. Soo saarista talaalkan wuxuu u baahanyahay isticmaalka khadka unuga uur-jiifka, gaar ahaan PER.C6.

Waa maxay khadka unuga uurjiifka? Khadadka unugyada uur-jiifka waxaa lagu koriyaa shaybaadhada iyadoo laga soo qaadayo unugyada asalka ah ee nudaha ilmaha. Waxaa loo korin karaa qaab aan qeexnayn. Soo saarayaasha talaalka COVID-19 waxay isticmaaleen laba khad oo unugyo uur-jiif ah oo taariikhi ah markay tijaabinayeen ama soo saarayeen talaalada:

- HEK-293 — Khadka Unug kali oo laga soo soocay uur-jiif qiyaastii 1972
- PER.C6 — Khadka unug il oo laga soo soocay uur-jiif laga takhalusay 1985

Soo saaridda talaalo ku tiirsan khadadka unugyadan uma baahna ilmo soo ridid cusub, waayo unugyadu iyagaa isugu tarmaya si xad lahayn shaybaadhka.

Jaantuskan ayaa qoraya talaalada COVID-19 ku jira horumarinta iyo haddii iyo sida ay u isticmaalan khadadka unugyadan uur-jiifka. tinyurl.com/420cndxg

Talaaladda COVID-19 ma ku jiraan walxo xoolaha laga soo qaatey? Talaalada Moderna iyo Pfizer Comirnaty ee Maraykanka kuma jiraan waxyaabo laga keenay xoolo. Ma jiraan maxsuul doofaar ama lo’ oo ku jira talaaladan. Waxay ka kooban yihiin mRNA, biyo, sonkor, milix iyo dufan (dux) aan laga keenin xoolo. Tallaalka Johnson & Johnson waxa ku jira adenovirus aan fifircoonayn, milix, sonkor, iyo emulsifier aan laga keenin xoolo.

Maxay ka yidhaahdeen iimaamyadu anshaxa qaadashada talaalka?

Dhaqangalinta Waajibaadka Muslimiinta Qaranka ee COVID-19 iyo Isbahaysiga Qaranka ee Muslimiinta Madow ee COVID waxay sameeyeen [bayaan wadajir ah](#) oo ku salaysan wadatashi lala yeesho hoggaamiyayaasha diinta iyo khabirada caafimaadka dadweynaha:

“Dhaqangalinta Waajibaadka iyo Isbahaysigu waxay kula taliyaan shaqsiyaad inay qaataan talaalada Pfizer iyo Moderna kadib markay kala wada-hadlaan dhaqtarkooga ama bixiyahoga daryeelka caafimaadka iyo khadka hagidda caafimaadka bulshada ee deegaankaaga.” tinyurl.com/1sfla4es

Su'aalaha inta badan la is waydiiyo?

Talaalku ma yahay badbaado? Haa. Maamulka Cuntada & Daawada (FDA) waxay u baahan tahay tijaabo adag oo ammaan ah kahor intaanay ansixin wax talaal ah. Tobanaan kun oo dad ah – oo ay ku jiraan dadka Oregon – oo ka yimid jinsiyado, da'o iyo dadka midabka leh oo badan, ayaa ka qaybqaatay tijaabinta talaalka. Daraasadahan ayaa la sameeyay si loo hubiyo in talaaladu ay buuxiyeen heerarka badbaadada oo ay u ilaaliyaan dadka leh da', jinsiyad iyo qowmiyado kala duwan.

Ma ammaan ba inaan qaato talaalka COVID-19 haddii aan qabo xaalad caafimaad oo soo jireen ah? Haa. Talaalka COVID-19 wuxuu si gaar ah muhiim ugu yahay dadka qaba xaaladaha caafimaad sida cudurada wadne xanuunka, cudurka sambabka, sonkorowga iyo buurnida. Dadka qaba xaaladahan waxay u badan tahay inay aad ugu bukoodaan COVID-19. Dadka qaba xaaladahan caafimaad waxay sidoo kale qayb ka ahaayeen baaritaanka talaalka.

Ka waran dhibaatooyinka talaalka? Marka loo eego FDA, dhibaataada ugu badan ee tijaabooyinka talaalka COVID-19 waxaa ku jiray xanuun, guduudasho ama barar ku yimaad goobta la muday, daal, madax-xanuun, qarqaryo, muruq xanuun iyo kalagoys xanuun.

Falcelintan ayaa macnaheedu yahay in talaalku ka shaqaynayo inuu ka caawiyo jirkaaga barashada sida loola dagaalamayo COVID-19 haddii aad qaado. Dadka badankood, dhibaatooyinkani waxay jiri doonaan waxaan ka badnayn maalmo kooban. Haddii aad qabtid wax walwal ah, wac dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada.

Talaalku ma u ammaan ba uurka ama naas nuujinta? Dadka uurka leh ama kuwa goordhow uurka ka baxey ayaa u badan iney si daran ugu xanuunsadaan COVID-19 marka loo barbardhigo dadka aan uurka lahayn. Xanuunada daran ee COVID-19 inta lagu jiro uurka ayaa laga baaqsan karaa iyadoo si buuxda la isku tallaalo. Xarunta Xakameynta iyo Ka-hortaga Cudurka ee (CDC) ayaa ku talineysa iney dhammaan dadka ka wayn da'da 12 sanno, ey ku jiraan dadka uurka leh, kuwa naaska nuujiya, iskudayaya iney hadda uur qaadaan ama laga yaabo iney uur qaadaan mustaqbalka ey qaataan tallaalka COVID-19.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan is tallaalida, way fiicantahay inaad kala hadasho daryeel bixiyahaaga caafimaad.

Wax badan ka baro wax ku saabsan uurka iyo tallaalada COVID-19 [halkan](#). tinyurl.com/ytofd9an

Ma waxa ku jira chip yar talaalka si dawladdu ay iila socoto? Maya. Talaalada COVID-19 kuma jiraan chip yar si loola socdo dadka. Sanduuqyada qaadista talaalka ayaa lala socdaa, sida shixnadaha kaleba, si loo hubiyo in lagu qaybiyay halkii looga baahna oo looga hortago tuugada. Waxa kale oo jira diiwaan meesha aad ka heshay tallaalkaaga si loo hubiyo inaad qaadatay dhammaan qiyaasahaaga.

Muslimiinti ma qaadan karaan tallaalka COVID muddada Ramadaanta? Haa! Qaadashada tallaalka COVID-19 ma burinayo soonka muddada Ramadaanta sida raacsan ra'yiga loo badan yahay ee culimada Islaamka (Gudidda Fiqiga Woqooyiga Ameerika, Golaha Shuurada Muslimiinta Ameerika).

Helitaanka dukumiintiga: Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriisi, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. La xidhiidh Xarunta Macluumaadka Caafimaadka lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhs.ohio.gov